

JEERMIS DA DEGDEG AH EE BIYAHA LA CABO

KALIYA ISTICMAAL BIYO SI KU HABOON LOO JEERMIS DILAY EE CABITAANKA AH, KARINTA, SAMEYNTA WIXII CABITAAN LA DIYAARINAYO AH.

☐ Isticmaal **biyo dhaleysan** ama biyo si ku haboon aad u diyaarisay iyo aad ugu keydisay sida keenaha biyo degdeg ah.

☐ **Karkari biyaha**, haddii aadan haysan biyo dhaleysan. Biyo karkarinta way ku fillantahay in ay disho jeermiska waxyeelada leh.


- Haddii biyaha kacsanyihiin, hadageen iyo ku fiiltareey weel nadiif ah, shukumaanka warqada, ama fiiltarka kafeega.
- Biyo la imaw wareega karinta ugu yaraan hal ilaa sedex daqiiqo.
- Biyaha ha u qaboobeen si dabiici ah iyo ku keydi well nadiif ah ee daboolan.
- Si aad u hormarisid tijaabada siman ee biyaha karkarsan, ku dar wax yar oo cusbo ah qeyb walboo hal liitar oo biya ah, ama ka shub biyaha hal weel oo nadiif ah ee dhoor jeer oo kale.



☐ **Biyaha jeermiska ka dil adiga oo isticmaalayo kiimikida guriga**, haddii aad biyo karkarin kartid. Kaliya u isticmaal si joogta ah kiimikada koloriinta, badeecada koloriinta biyaha ee ku haboon jeermis dilid iyo nadaafada sida lagu tilmaamay aastaanta.

Ha isticmaalin carfiso, badbaadada midibka, ama baliijka lagu daray nadiifiyayaal.

- Haddii biyaha kacsanyihiin, hadageen iyo ku fiiltareey weel nadiif ah, shukumaanka warqada, ama fiiltarka kafeega.
- Ka raadi ridaha nadiifka armaajada daawadaada ama qalabka alaabaha degdega.
- Raadi baliijka koloriinka cusub ama baliijka koloriinka biyaha ah ee lagu keydiyo qol heer kululkiisa ka hooseeya hal sanno. Aastaanta waa in ay dhahdaa waxay wadataa 8.25% ee sodium hypochlorite.
- Isticmaal jadwalka bogga xigga sida tilmaanta inta baliijka ah ee ah in aad ku dartid biyaha, tusaale, ku dar lix dhibcood o biliij ah qeyb walboo biyo ah. Labo jibaar tirada biliijka haddii biyahah kacsanyihiin, midabeysanyihiin, ama aad u qabowyihiin.
- Qas sug ilaa 30 daqiiqado. Biyaha waa in ay lahaadan ur yar oo koloriinta ah. Haddii aysan laheyn, ku celi garoojada iyo sug ilaa 15 daqiiqo isticmaalka ka hor.
- Haddii koloriinta ay u dhadhanto mid aad u xoogan, kaga dar biyaha hal weel oo nadiif ah ee midka kale iyo sug dhoor saacadood isticmaalka ka hor.



Tirada Biyaha	Tirada Biyaha Biliijka lagu darayo†
1 rubac / liitar	2 dhibcood
1 qeyb / 4 litar	6 dhibcood
2 qeyb / 8 litar	12 dhibcood (1/8 qaado)
4 qeyb / 16 litar	1/4 qaado
8 qeyb / 32 litar	1/2 qaado

Wixii warbixin dheeraad ah:

<http://www.ready.gov/water>

<https://www.redcross.org/>

<http://water.epa.gov/drink/emmerprep/emergencydisinfection.cfm>